Somali

SIDEE LOO DAAWEEYAA CUDURKA **ISNADAAMISKA**

Jawaabaha su'aalihiina

Hôpitaux Universitaires Genève

Horudhac

MACLUUMAAD

Waxaa dhici karta in qof kamid ah qaraabada uu qabbo xanuun ayada oo aan ka muuqanin calaamadaha xanuunka (cudur side caafimaad qabba) kadibna ku daarta dadka hareerihiisa ah. Muhiimadu waxay tahay in la daaweeyo hareeraha oo dhan.

Muxuu yahay cudurka isnadaamiska?

Cudurka isnadaamiska waa cudur ku lug leh gubashada maqaarka wuxuuna ka ahaadaa mid kamid ah xasharaadka waana cayayaanka isnadaamiska. Isnadaamiska wuxuu yahay in ay soo baxaan nabaro guduudan oo yar-yar, gaar ahaan waxay kasoo baxaan faraha dhexdooda, cur-curka iyo goobta taranka. Cun-cunkana wuxuu daranyahay habbeenkii.

Cudurka isnadaamiska waa cudur la isku daarto wuxuuna ku gudbaa taabashada tooska ah ama taabashada aan tooska ahayn ee la taabto dharka ama marada sariirta uu ku jiifto qofka xanuunsan. Wuxuuna si fudud ugu faafaa in lala noolaado dadka ama la dhexgalo. Wuxuu soo baxaa kadib maalmo yar oo la qaado cudurka waxaana adag mararka qaar in la oggaado nooca cudurka. Waxaa baaritaan ku sameeya dhakhtar ku takhasusay cudurada maqaarka midkaas oo ku fiiriya noole ku dul noolaha shaybaar maqaarka ah.

Qofkee ayay tahay in la daaweeyo?

Waxaa muhiim ah in la daaweeyo dadka qabba cudurka iyo alaabtooda, dharkooda khaaska ah si loo irib tiro cayayaanka isnadaamiska. Sidoo kale waxaa khasab ah in hal mar la daaweeyo dadka (dadka hal meel isla degan) iyo kuwa ay xiriirka dhow la leeyihiin qofka cudurka qabba, xitaa haddii aan ka muuqanin calaamadaha cudurka.

Daaweynta **dadka**

Sidee u dhacdaa daaweynta?

Waxaa loo tixgeliyaa daawada Ivermectine in uu yahay kiniini aad saameyn u leh. Dumarka uurka leh iyo kuwa ilmaha nuujiya, waxay isticmaali karaan daaweyn munaasab ah sida (boomaato).

MUHIIM

Waxaa muhiim ah in ay hal mar wada qaataan daaweynta dhammaan dadka cudurka qabba.

Maalinta koowaad ee daaweynta (J 0)

- U qaado daawada Ivermectine sida laguugu soo qoray hal mar waxaana wanaagsan in la qaato marka la cunayo cashada, ayada oona lagu cabbo koob weyn oo biyo ah. Carruurtana, waxay jejebin karaan hal habbo oo kaniiniga ah.
- Kadib marka laga joogo ugu yaraan 8 saacadood, midaas oo macnaheedu tahay subaxda maalinta xigta, qubeyso adiga oona ku qubeysta saabuunka qubeyska.
- Isticmaal marooyinka musqusha iyo dhar nadiif ah kuwaas oo aan wasakh lahayn.

Maalinta 14 ee laga joogo daaweynta (J 14)

- Ku celi markale qaadashada daawada Ivermectine iyo daaweynta alaabta iyo dharkaaga gaarka ah (akhri hoos).

+

MACLU-UMAAD

Iska jar cidiyahaaga kana dhig kuwo gaaban si aad uga fogaatid in aad dhaawac isku gaysatid marka aad xoqanaysid una celisid in cayayaanku galo cidiyahaaga.

Calaamadaha ay khasab tahay in la oggaado

Inta lagu guda jiro seddexda todobaad ee ku xiga bilaabida daaweynta, fiiri haddii uu weli jiro cun-cun (cun-cun) ku dhaca dadka hareerahaaga ah kuwaas oo aan daawada qaadanin. Haddii aad ka shakisid, la tasho dhakhtar ku takhasusay cudurka maqaarka ku dhaca. Waxaa suurtogal ah in uu sii jiro cun-cunka illaa 3 todobaad xitaa kadib marka loo qaato daawada si sax ah (barar sabab u ah daawada). La tasho dhakhtarka markale haddii uu weli sii jiro cun-cunka muddo 4 todobaad ah kadib daaweynta.

Daaweynta **deegaanka**

Maxay yihiin tallaabooyinka la raacayo?

Waxaa khasab ah in la daaweeyo deegaanka kadib 8 saacadood marka la qaato daawada Ivermectine (yacnii kadib 8 saacadood marka aad qaadatid daawada marka kuugu horaysa iyo kadib marka aad qaadatid tookada labbaad). Waa in aad xiratid gacmo gashi si aad sidaan u samaysid.

Dhar dhaqida

Dharka la dhaqi karo oo lagu dhaqo darajo boqolkiiba 60 °C

- Ku dhaq dhammaan dharka darajo heer kul keedu yahay boqolkiiba 60, dharka hoosta laga xirto, shukumaanada, go'yada sariirta, dhammaan marooyinka sariirta la isticmaalay todobaad ka hor.

Dharka aan la dhaqi karin laakiin aanan xamili karin kuleylka darajada boqolkiiba 60 °C

- Ku xir dharkaan bac muddo todobaad ah Bac balaastiik ah oo si fiican u xiran (ayada oo aan la isticmaalin rusheeye lid ku ah cayayaanka).
- Kadibna ku dhaq markaas kadib darajo heer kul munaasab ah (30-40 darajo).

AMA
- Ku buufi qalab buufiye lid ku ah xasharaadka khaaska ah.
- Ku xir bac balaastiik ah oo si fiican u xiran.
- Uga tag meesha muddo 48 saacadood ah.

Waxyaabaha ku saabsan dharka kale

Sidoo kale waxaa waajib ah in la daaweeyo marooyinka, barkimaha, ku beertooyinka, kuraasta lagu fadhiisto, roogaga, kuraasta baabuurka, alaabta ay carruurta ku cayaaraan, kabaha iyo dharka aan la dhaqi karin, ayada oo lagu buufiyo daawo rusheyn lid ku ah xasharaadka khaaska ah.
- Waa in aad raacdid digniimaha isticmaalka, sababtoo ah daawada la rusheeyo waxay noqon kartaa mid lagu dareemo cun-cun ama xajiimo.
- Ka buufi masaafo kuu jirta 20 sinti mitir.
- Uga tag 30 daqiiqo si uu saameyn u yeesho adiga oona qolka ka baxa.
- Meesha hawo soo geli sugna ugu yaraan 12 saacadood kahor inta aadan dib u isticmaalin go'yaasha sariirta, marooyinka sariirta iyo kuraasta lagu fadhiisto.

Sidoo kale waxaa suurtogal ah in la isticmaalo qalabka dharka lagu qalajiyo ayada oo la geeyo meesha kuleylka ah ama qalab uumiye oo aad u kulul (ugu yaraan darajada boqolkiiba 60°C).

Macluumaad camali ah

Xiriirka

Service de dermatologie et vénéréologie
(Qaybta cudurada maqaarka iyo taranka)
Rue Gabrielle-Perret-Gentil 4, 1205 Genève
Dhismaha C, doorka 4aad
☎ 022 372 94 23

Saacadaha

Laga bilaabo Asniinta illaa Jimcaha saacada 9 illaa 11 Subixii 1 illaa 4 galabtii.
Ballan la'aan Arbacada laga bilaabo 8 Subaxnimo illaa 5 galabnimo.
Ballan ayada oo la dhigto maalmaha kale ee asbuuca.

www.hug-ge.ch/dermatologie-venereologie

Buugg yarahaan waxaa laga sii daayay, midkaas oo laga baroogeeyay dhinaca dadka xanuunsan, dhinaca qaybta xanuunada maqaarka iyo taranka Isbitaalada jaamacadaha Geneve (ay la jirto kooxaha bixinta macluumaadka dadka xanuunsan iyo qaraabada).